Golaha deegaanku wuxuu go’aan ku gaaray xeerarka soo socda oo khuseeya carruur-haynta xilliga ka baxsan waxdhigista dugsiga (SFO):

1. **Hadafka**

Ujeeddada laga leeyahay SFO-ga waa in carruurta dhigata safafka kowaad ilaa afraad ee dugsiga hoose iyo carruurta qabta baahida gaar ah ee dhigata toddobada sanadood ee dugsiga hoose ay helaan ilaalin iyo daryeel. Isla markaa waa in carruurta qabta baahida gaarka ah ay helaan fursado wacan oo horumar ah (eeg Xeerka waxbarshada § 13-7). SFO-gu waa inuu ilma kasta u diyaariyo horumar, kaas oo uu ka dhex helayo isla xiriiridda iyo isla macaamilka bulshannimo, iyadoo diiradda la saarayo waxa u wanaagsan ilmaha iyo ciyaarta oo u noqota nashaado (firfircooni). Carruurtu cayaar jacayl ayay u cayaaraan, cayaarta ayayna wax ku dhex bartaan. Carruurta waa in la siiyo fursad ay waqtigooda ay firaaqada yihiin si firfircoon ugu isticmaalaan nooc walba oo dheel ah, dhaqan-dhisid iyo nashaadooyinka lagu mashquulo xilliga firaaqada (fritidsaktiviteter) iyadoo la eegayo carruurta da’dooda, heerka awooddooda iyo xiisahooda. Arrintan waa inay dhacdo iyadoo isfahan iyo iskaashi qumman lala yeelanayo qoyska ilmaha iyo inay waafaqsanaato hadafka dugsiga sida lagu sheegay Xeerka waxbarashada § 1. SFO-ga waa in loo dhaqan geliyo si waafaqsan xeerarka guud, go’aammada degmada, qorshaha tayo wanaagga ee SFO-ga iyo qorshaha u yaal qaybtaa goonida ah.

2. **Mulkiilaha iyo mulkiyadda**

Degmada Trondheim ayaa ka mas’uul ah shaqo socodsiinta SFO-yada degmada. Degmadu waxay shaqada SFO-ga ku fulisaa goobo ay leedahay ama ay kiraysatay.

3. **Goobta dheesha iyo joogitaanka (Leke- og oppholsareal)**

SFO-gu waa inuu leeyahay goob dheel iyo joogitaan isugu jirta kuna habboon nashaadadda la samaynayo oo u dhiganta ugu yaraan afar mitir oo isku wareeg ah halkii ilmoodba. Barnaamijka jaangooynta bedka iyo waxa lagu qabanayo (funksjons- og arealprogrammet) waxaa SFO-ga loo qoondeeyay in ilmo waliba leeyahay 0,35 m2. Bedka inta ka hartay waa in loo wada adeegsado hawlaha kale ee dugsigu qabto (qolal waxbarasho guud iyo gaar ahaaneed, hool tababbarka jirka, makhaayad, iwm).

4. **Qaadasho (aqbilaad)**

4.1 Dhammaan ardayda dhigata safafka 1aad ilaa iyo 4aad iyo dhammaan ardayda qabta baahida gaarka ah ee dhigata safafka 1aad ilaa iyo 7aad waxay xaq u haystaan deeq waxdhigista dugsiga ka hor iyo ka dibba. Carruurta qabta baahida gaarka ah waxaa lagu qeexaa ardayda si uun u qabta kala-dhinnaan waarta taas oo keenaysa baahi weyn oo waarta oo ay u qabaan caawimo, oo wadata in waxdhigista caadiga ah iyo haddii loo baahdo waxdhigista khaaska ahba wax la isugu dubbarido.

4.2 Xafiiska waxbarashada iyo barbaarinta ayaa sameeya qaadashada. Ardayda qabta baahida gaarka ah, fiiri qeexidda ku qoran qodobka 4.1, waxay codsanayaan boos, maamulaha ayaana gaaraya go’aan khuseeya booska SFO-ga. Xafiiska waxbarashada iyo barbaarinta ayaa ah hay’adda loo cawdo.

5. Lacgta waalidku bixiyo

5.1 Golaha deegaanka ayaa gooya lacagta waalidku bixiyo taas oo ku xiran sida loo dejiyo miisaaniyadda sanadlaha ah, iyo haddii ay jiraan xeerar khuseeya lacag-ka-dhaafid (moderasjon) iyo boosas bilaash ah.

5.2 Warbixin khusaysa lacagta waalidku bixiyo iyo waxa lagu saleeyey xisaabinteeda waxaa lagu sameeyaa kolka la dejinayo miisaaniyadda sanadlaha ah.

5.3 Dhammaan nashaadooyinka (firfircoonida), iyo dibed aadista maalin dhan xilliga dugsigu fasaxa yahay, waa u bilaash waana u furan tahay dhammaan ardayda ku jirta SFO-ga.

5.4 Lacagta booska SFO-ga waxay ka bilaabmaysaa taariikhda qoyska la siiyo booska.

5.5 Muddada aad u haysato booska oo aad fasaxdo waa hal bil oo ka bilaabanta bil kowdeeda. Boos fasaxaadda oo iligtrooni ah waxaa laga dirayaa barta SFO-ga ee degmada.

5.6 Lacagta saamiga (kontingent) waa la bixinayaa ilaa iyo inta ay ka dhammaato boos-fasaxaaddu.

5.7 Haddii lacagta la bixin waayo degmadu way ku eryi kartaa. Ma dhaci karto in lagu aqbilo haddii ay jirto lacag aadan bixin oo ah saami/lacag cunto xilli hore oo aad boos ka haysatay xannaanada carruurta/SFO-ga.

5.8 Waqtiga joogitaanka SFO-u waa laba nooc: Joogitaan ah ilaa 12 saacadood usbuucii iyo joogitaan ah 12 saacadood iyo ka badan usbuucii.

5.9 Haddii wax laga beddelayo waqtiga joogitaanka waa in la sameeyo kowda bisha iyadoo hal bil ah oo digniin la sii bixiyey.

6. Waqtiga uu furan yahay

6.1 SFO-gu wuxuu furan yahay dhammaan maalmaha la shaqeeyo laga reebo maalmaha qorshe u dejinta SFO-ga iyo labada usbuuc ee fasaxa guud ee kulaylaha ugu horreeya. Way dhici kartaa in SFO-ga la xiro 24.12, 31.12 iyo arbacada ka horraysa khamiista booskaha (skjærtorsdag) ka dib wada tashi lala yeeshay brukerådet (gudiga loo adeegayaasha).

6.2 Saacadaha uu furan yahay waa maalinta inta u dhexaysa 07.00-17.00, hadba sida ay tahay baahida dugsi walba iyo kadib la tashi lala sameeyo brukerråd.

6.3 Iyadoo lagu ekaynayo miisaaniyadda loo qoondeeyay ayaa dugsigu keligii ama cid kale ha kaashadoe ku deeqayaa SFO-ga maalmaha uu dugsigu fasaxa yahay ama fasaxyada guud ah (kuma jiraan usbuucyada uu SFO-gu xiran yahay kulaylaha).

6.4 Dhammaan carruurta waa in laga fasaxo SFO-ga, waxayna qaadanayaa fasax saddex usbuux oo ah fasaxa kulaylaha iyo shan maalmood oo ah maalmaha qorshe u dejinta SFO-ga inta uu socdo sanad dugsiyeedku.

6.5 Waqtiga joogitaanku waa wadarta waqtiga uu ilmuhu joogo SFO-ga ka hor iyo ka gadaal waqtiga waxdhigista. Isu geynta saacaduhu inta ay isku noqdaan usbuucii waa inay is leekaadaan tirada saacadaha ee ku qoran sicir-goynta la bixinayo.

6.6 Waa laga heshiin karaa in muddoooyin dhaadheer laysku afgarto kolka xilliga shaqada waalidiinta ay taas wacdo.

6.7 Usbuucyada uu dugsigu fasaxa yahay waxaa ardayda haysata booska saacadaha yar u bannaan inay joogaan 3 maalmood oo buuxa oo ah isniin, talaado iyo arboco.

7 Hoggaaminta iyo cududda shaqaalaha

7.1 Maamulaha ayaa ah hoggaamiyaha SFO-ga maamul ahaan iyo hawl wadidba. Hoggaamiyaha shaqo fulintu (daglig leder) waa inuu leeyahay tacalliinta sare ee loo baahan yahay, oo uu hayo waqti uu u qoondeeyey maamulitaan sida uu qabo sfs 2201 ee heshiiska shaqada iyo shaqaalaha (avtaleverket). Intaa wixii ka baxsan waxaa la rabaa aqoon iyo xirfad fulin kala heer heer ah.

7.2 Cududda shaqaale ee qaabilsan qaybaha carruurta waa in lagu qiyaaso tiradacarruurta ee goobta joogta, da'da carruurta, iyo haddii loo baahdo la socosho gaar ah oo hal ilmo ama kooxo la siiyo. Sharciyan waa in halkii qof ee weyni aanu la jirin in ka badan 15 ilmood, oo fasalada hoosana ay qumman tahay in tiro intaa ka yari ay ku soo hagaagto halkii qof ee weyn.